

Sebtembar 14, 2021

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee Dugsiga Marysville School,

Waxaa naloo soo sheegay in shakhsii ka tirsan dugsiga Marysville School laga helay COVID-19. Waxaan si dhow ula shaqeyneynaa Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah iyo Adeega Waxbarashada Degmada Multnomah si aan u aqoonsano qaabka ugu wanaagsan ee loo ilaalin karo dadka laga yaabo inay ka ag dhawaadeen qofkan. [Iyada oo qeyb ka ah ka jawaabista guud](#) ee lagu ilaalinayo qof kasta oo ka tirsan kooxda isla markaana loo ilaaliyo caafimaadka bulshadeena, waxaan si ku-meelgaar ah kooxaha ay dhibaatadu saameysay ugu wareejinaynaa Barashada Dhammeyskatiran ee Onlaynka ah.

Fadlan ogsoonow in haddii AAN si gooni ah laguu ogeysiin in ardaygaagu u baahan yahay karantiil, waxay awoodaan inay sii wataan ka qeybgalka waxqabadyada goobta xilligan.

Xaalad kasta oo u baylihida COVID-19 ahi waa mid gaar ah waxaanay u baahan kartaa jawaab ka duwan. Xaaladdan oo kale, degmadu waxay qaadaysaa tallaabooyinka soo socda:

1. Ka xaqijinta warbixinta in cid laga helay COVID-19 Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah.
2. U dirista **ogeysiis gooni ah** dhammaan kooxaha u baylahay cudurka iyadoo laga cadsanayo inay isku karantiilaan guriga 10 maalmood si loola socdo astaamaha. Tan waxaa ka mid noqon kara ardayda iyo shaqaalaha ku jira kooxaha fasalka ee u baylahay, jidadka basaska, iyo kooxaha waxqabadyada/ciyaaraha fudud.
3. Si taxaddar leh u raacida tilmaamaha amarka ah ee yareynta in COVID-19 ku faafo dhismaha dugsiga, taas oo ay ku jirto shuruudaha nadiifinta iyo jeermis-dilidda maalinlaha ah ee ay [dhigayaantilmaamaha ku laabashada dugsiga ee Oregon](#).
4. Magacyada ardayda iyo shaqaalaha dugsiga u soo sheega dhacdada jirrada COVID-19 waxa laga dhigi doonaa qarsoodi. Wuxaan kaa cadsanaynaa inaad fadlan ixtiraamto asturnaanta qofkasta oo uu saameyo COVID-19.

Sida ay sheegtay Xarumaha Xakameynta iyo Ka Hortagga Cudurrada, qaababka ugu wanaagsan ee [lagaga hortaggi karo faafitaanka COVID-19](#) waa in guriga la joogo marka la jirran yahay, in la xirto maaskaro ku leeg, maaskaro lakabyo badan leh, in lagu dhaqmo kala-foggaanshaha jireed, iyo in lagu dhaqmo caadooyinka caafimaadka-nadaafada ee wanaagsan. Kuwan waxa ka mid ah inaad gacmahaaga si joogto ah ugu dhaqdo saabuun iyo biyo, inaad daboosho qufacaaga iyo hindhisadaada, iyo inaad iska ilaalo taabashada dadka leh astaamaha cudurka. Xirashada maaskaradu waxay yareysaa faafidda fayraska hawo-mareenka, laakiin maaskaradu *ma* beddeli karto kala-foggaanshaha jireed. Shakhsiyaadku waa in ay ka foggaadaan ugu yaraan 6 fuudh dadka ka baxsan reerkooda xitaa marka ay xiran yihiin maaskarada. Sidoo kale waa muhiim **inaad u ogeysiiso dugsiga** haddii ardaygaagu yeesho [astaamaha COVID-19](#) ama haddii ardaygaaga ama xubin ka tirsan reerkaaga laga helo COVID-19. Fadlan hubi in macluumaadkaaga xiriirkha ee uu hayo xafiiska dugsigu ay sax yihiin.

Haddii aad qabtid su'aalo la xiriira caafimaadka, fadlan la xiriir kalkaalisaada caafimaadka ee hugsigaaga, bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka, [waaxda caafimaadka ee deegaankaaga](#), ama eeg [bogga internetka ee CDC](#).

Si daacadnimo leh,

Cathy Murray, Maamule

Kathleen Ellwood, Agaasiimaha Sarre ee Aaga iyo

Ann M Loeffler, MD Ku Xigeenka Sarkaalka Caafimaadka, Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah
diseasereport@multco.us



PORLAND
PUBLIC
SCHOOLS

